



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

Hadal-qorolaaka kal.6-aad
Documentiga Kal.6-aad kul.17-aad

19/05/2015

Kalfadhiga 6-aad

Kulankiisa 17 -aad Saac.Fur. 11:40gh-Saac. Xir.12:25gd.

Guntinta (Qourum) 146 Xildh.

Ajendaha

- 1. Furitaanka Aayadaha Qu'aanka kariimka**
- 2. U codeynta Motion Codsanaya Codeyn Qarsoodi ah**
- 3. Iyo wixii kale ooh awl ah**

1.Shir-guddoomiye Guddoomiyaha Baarlamanaka JFS Mudane ,Maxamed Sheekh Cusmaan (Jawaari).

Waxaa shirka furay Guddoomiyaha Baarlamanaka JFS.Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan Jawaari ,waxaa lagu furay Aayadaha Qur'aanka kariimka ,uuna akhriyey Xildhibaan Sheekh Shaacir.

2.Guddoomiyaha wuxuu sheegay in Ajendaha maanta uu ka kooban yahay u codeynta Motion codsanaya codeyn qarsoodi ah .

3.Wuxuu kaloo sheegay in Madax-weynaha JFS Mudane Xasan Sheekh Maxamuud uu maanta imaanayo Golaha Baarlamanaka si khudbad ugu jeediyo.

Guddoomiyaha wuxuu Xildhibaanada weydiiyey in ay ku raacsanyihiin,Xildhibaanaduna way ogolaadeyn.

4.Motionka waxa uu ka soo gaarey qoraal ay soo gudbiyeen 29 Xildhibaan ,waxayna codsadeyn

a)-In Cod qarsoodi ah lagu qaado u codeynta Guddiga Doorashooyinka ee Madaxa Banaan.

b)-u codeynta musharaxiinta ay noqoto qof-qof oo gacantaag ah.

5. Guddoomiyaha wuxuu amrey in Xoghaynta ay soo qoraan inta xildhibaanee ee joogta xoghaynta waxa ay soo gudbiyeen in Golaha ay fadhayaan 154 Xildhibaan.

6. Guddoomiyaha wuxuu sheegay markii saf-saf inta fadhida loo tiriyey ay noqotay sida tan:-

Safka 1-aad (A) -19 . Safka 2-aad (B)-24 ,Safka 3-aad (C)-24 , Safka 4-aad (D)-19 ,

Safka 5-aad (E) -27 ,Safka 6-aad (F)-28 ,Safka 7-aad (G)-13

7. Guddoomiyaha wuxuu sheegay in codeynta ay noqoneyso Qarsoodi.

Imisaa ogol in codeynta ay ahaato qarsoodi.

Waxayna u dhacdey sida tan ee shaxda hoos ku qoran:

Xildhibaanada	Safka A	Safka B	Safka C	Safka D	Safka E	Safka F	Safka G	Wadarta
Inta Ogol	14	18	19	13	13	19	5	101
Inta Diidan	5	6	3	6	14	9	7	50
Inta ka Aamustay	0	0	2	0	0	0	1	3
								154

8. Guddoomiyaha wuxuu sheegay kulanka 17-aad in uu hakiyey dibna ay ka dhameystiri doonaan Saacadu markey ahay12:25gd